




# MIYAAN UBAAHANAHAY INAAN XIDHO MAASKARO

Maaskarooyinku waa difaac dheeraad ah oo looga hortagaayo COVID-19 ka kajira aagaga uu bulshada ku dhex faafay. Akhri talada gobalkaaga maxaliga ah iyo aaga ee ku aadan talooyinka iyo shuruudaha maaskarooyinka. Haddii aad ku jirto xaalad ay adag tahay inaad dadka ka fogaato sida gaadiidka dadwaynaha, waxaad dooran kartaa inaad xirato maaskaro.

## Si aad uga badbaado COVID, samee 3-dan:

1. Dhaq ama nadiifi gacmahaaga
2. Kala-fogaanshaha bulshada (1.5m)
3. Hayso barnaamijka COVIDsafe.


Sidoo kale joog guriga haddii aanad caafimaad qabin oo lagu baadhay.



Haddii aad doorato inaad xidhato maaskaro, waa muhiim:



Inaad dhaqdo gacmahaaga kahor xidhashada maaskarada.



Hubi inay daboolayso sankaaaga iyo afka oo si siman u-leegtahay gadhkaaga, ka sarrayso kala-jeexa sankaaaga iyo dhinacyada wejigaaga.



Ha taaban xagga hore ee maaskarada intaad xidhan tahay ama markaad saarayso. Haddii aad taabato maaskarada, dhaq ama nadiifi gacmahaaga isla markiiba. Ha u-oggolaan in maaskaradu ka lulato qoortaada.



Dhaq ama nadiifi gacmahaaga kadib saarista maaskarada.



**\*Maaskarooyinka halka mar la isticmaalo waa in aan dib loo isticmaalin waana in la tuuraa isla markiiba isticmaalka kadib.**

**MUHIIM:** Dadka qaba cudurrada sambabka ee daba-dheeraada waa inay raadsadaan talo caafimaad kahor isticmaalka maaskarada.

Macluumaad dheeraad ah [www.health.gov.au](http://www.health.gov.au)